



---

**Waaxda Kastamada Somaliland**

---

**NAADINTA XARAASHKA BADEECADDO KU MUDO-DHAAFAY KASTAMKA DEKEDDA BERBERA.**

Xeerka Kastamada Somaliland Xeer Lr. 73/2016, waxa uu Waaxda Kastamada awood u siinayaa inay xaraashto badeecaddaha lala wareegay, kuwa laga tegay ama aan lagula bixin waqtigii loogu talagalay, iyada oo loo raacayo Xeer-Nidaamiyaha Xaraashka ee Xeer Lr. 03/2019.


Sidaa darteed, Wasaaradda H. Maaliyadda Waaxdeeda Kastamada oo kaashanaysa Shirkadda Dp.World iyo Sharaa'iga Rarka Maraakiibta ka shaqeeya waxa ay cidii danaynaysa ku wargalinaysaa inay bilawday xaraashka qaar ka mid ah badeecaddaha ku mudo-dhaafay Kastamka Dekedda Berbera, kadib markii ay baafinaysay cidii lahayd.

Hadaba, waxa lagu wargalinayaa cidii danaynaysa koontiinarada faahfaahintoodu hoos ku xusantahay ee ku mudo-dhaafay Kastamka Marsada Caalamiga ah ee Berbera inay ku soo xaraystaan araajida codsiga xaraashka mudo **15** cisho gudaheeda oo ka bilaabmaysa **11** bisha **June/2024**, iyadoo wixii macluumaad dheeri ah ee intaa ka badan lagala xidhiidhayo Xarunta Guud ee Waaxda Kastamada ama Kastamka Dekedda Berbera.

Faahfaahinta koontiinarada {Containers} la xaraashayo waxa aad ka dheehan kartaa shaxdan hoose:-

Date of Arrival	Container No.	Shipping Agent	BoL	Importer	Goods
-	PCIU 0949870	PIL	-	-	Rush
-	PCIU 8208184	PIL	-	-	ACID
-	PCIU 8560906	PIL	-	-	ACID

**F.G.** Waxa aanu sidoo kale ku baahinay mareegta Wasaaradda Horumarinta ee [www.slmof.org](http://www.slmof.org) Habraaca Xaraashka, foomka codsiga xaraashka, war-bixintii baadhista containers-ka {goods examination report for auctions} oo lagu soo lifaaqay sawiradooda.

 [www.slmof.org](http://www.slmof.org)/ [www.som.slmof.org](http://www.som.slmof.org)

 [Info@slmof.org](mailto:Info@slmof.org)

 9494

WhatsApp No: + 252-657729999